

# Isdiiwaangali si aad cod u bixiso

Dadka reer Londonow marka hore hubiya inaad isdiiwaangelisaan si aad u codaysaan waxay idinku qaadanaysaa daqiiqado haddii aad booqataan [www.gov.uk/register-to-vote](http://www.gov.uk/register-to-vote)

Waxaa khasab ah in da'daadu tahay ama ka wayntahay 16 si aad isu diiwaangeliso waxaad isdiiwaangalin kartaa haddii aad tahay:

- Muwaadin Biritish ama Irish ah
- Mid buuxiyey shuruudaha muwaadinimo ee Commonwealth
- Mid buuxiyay shuruudaha muwadinimo ee midawga yurub EU: Denmark, Luxembourg, Poland, Portugal, or Spain
- Muwaadin EU oo leh xaquuq La sii haystay: waa muwaadin ka yimid waddan kale oo katirsan EU kaasoo haysta oggolaansho sogalitaan ama joogis uk laga soo bilaabo 31dii bisha 12naad ee sanadkii 2020, taas oo u sii socotay si aan kala go, lahayn



Halkan iska diiwaangali!

## London waxaa ka jirta saddex nooc oo doorasho



Doorashada Duqa London iyo Golaha London Assembly (Golaha Deegaanka)



Doorashada guud/baarlamaanka



Doorashada maxaliga ah/degmooyinka

Muwaadiniinta British, Irish iyo kuwa ka tirsan dalalka Commonwealth-ka ee u qalma waxay xaq u leeyihiin inay codeeyaan doorashada Duqa London / Golaha Deegaanka London, doorashada guud / baarlamaanka, iyo doorashada Maxaliga ah/ degmooyinka.

Muwaadiniinta u qalma ama xaqqa u leh coddaynta kuwaasoo ka wayn 18 sano waa kuwo coddaynkara doorashada Duqa London/golaha Deegaanka London doorashooyinka Maxaliga iyo degmooyinkaba.

# Aqoonsiga sawirka leh ee la ogolyahay

Waxaa jira noocyo badan oo Aqoonsi sawir leh ah oo la aqbalayo kaas oo aad u isticmaali kartid inaad adigu kusoo coddaysa xarunta codbixinta.

Kuwan waa tusaaleyaasha sharciyadaas:

- Laysinka darawalnimada UK, Channel Islands or EEA (driving licence)
- Baasaboorka UK, Commonwealth or EEA (passport)
- Kaadhka aqoonsiga qaranka ee ay bixisay dowlad ka tirsan EEA
- Dukumeenti socdaal oo Biometric (faraha iyo indhaha layska dhigo) ah (oo ay ku jiraan Fiisaha elektarooniga ah ee eVisas)
- Kaarka barnaamijka loo yaqaan (Blue Badge)
- Kaarka Oyster 60+ ama kaarka (Freedom Pass)
- Kaarka Aqoonsiga oo wata calaamadda hologram-ka ee nidaamka caddaynta da'da (PASS card)
- Foomka Wasaaradda Difaaca ee Form 90 (Kaarka Aqoonsiga Difaaca) iyo Foomka Wasaaradda Difaaca ee Form100 (Kaarka Halgameyaasha Ciidamada Qalabka Sida)

Haddii aadan haysanin kaadh la aqbali karo ama Aqoonsi sawir leh oo aad ku coddaysa waxaad awood uleedahay inaad codsatid shahaadada bilaashka ah ee **Voter Authority Certificate** at

[www.gov.uk/apply-for-photo-id-voter-authority-certificate](http://www.gov.uk/apply-for-photo-id-voter-authority-certificate)



Halkan ka codso